

1. Turjubaanka waxaa waajib ku ah inuu ilaaliyo xogta uu ku ogaado inta uu turjumaayo.
2. Turjubaanku uma isticmaalikaro xogata uu ogaado si qaldan.
3. Turjubaanku uma turjumi karo qof ay qaraabo am axigto yihiin, ama hadii ay quseyso arinta laga hadlayo.
4. Turjubaanku ma qaadan karo shaqo turjubaanimo ah hadii usan arinta laga hadlayo khibrad u laheen.
5. Turjubaanku waa inuu isu sii diyaariyaa arinta uu turjumidoono waxa ay ku saabsan tahay ama ay quseyso inta aan la gaarin.
6. Turjubaanku waa inuu u turjumaa si dhameystiran arinta uu turjumayo. Waxna kama tagi karo waxna kuma dari karo.
7. Turjubaanku waa inuu dhex-dhexaad ka ahaa daa labada dhinac ee uu ukala turjumayo. Mana saameyn karto dareenkiisa iyo aragtidiisa gaarka ah arinta uu turjumayo.
8. Turjubaanku ma caawinkaro mana u doodi karo labada dhinac ee uu ukala turjumayo. Waajibka saarani waa inuu ukala turjumaa labada dhinac.
9. Turjubaanku waa inuu u dhaqmaa hadaba xaaladu sida ay u taalo.
10. Turjubaanku waa inuu sheegaa caqabad kasta oo ka hortimaada ama u diida inuu waajibkiisa shaqo u guto si hufan.
11. Turjubaanku waa inusan ku kicin waxyaalo ka horimaanaya xirfadiisa shaqo.
12. Turjubaanku waa inuu markasta horumariyaa xirfadiisa shaqo.